OGOW XUQUUQDAADA.

Xaashida xaqiiqda ee qaxootiga iyo magan gelyo:
Wareysiga FBI ama DHS.

Maxaan sameeyaa haddii FBI ama DHS ay iga codsadaan wareysi?

- La xiriir qareen (lawyer) ka hor inta aadan la hadlin DHS ama FBI.
- Waxaad xaq u leedahay qareen (lawyer) ka hor inta aadan la kulmin qof ka socda DHS ama FBI.
- Waad diidi kartaa waraysiga, laakiin taas waxaa loo arki karaa xaalado shaki ku sugan.

Fiiro gaar ah: Hadii aad ka heshid dokumentiyo ka socda FBI/DHS, waxaan kugula talineynaa in aad la xiriirto qareen(lawyer).

Caawimaad xaga sharciga ah oo bilaash aad ku heli karto:

Tahirih Justice Center: Houston@Tahirih.org
Human Rights First: TXProbono@humanrightsfirst.org/ (713)955-1360.

Adeegyada International YMCA Services: caawimaad bilaash ah xaga sharciga:
Maalin walba oo Arbaco ah 9:00 subaxnimo – 3:00 galabnimo.
Oo kutaala: 6300 Westpark Dr, Suite 600

Catholic Charities: Soo wac numberkan: 713-874-6570 in aad hesho war galin. (charlas) at 2900 Louisiana St.
Yay yihiin qolyaha FBI/DHS iyo sababaha ay u doonayaan inay i wareystaan?

- DHS waa hay'ad dowladeed oo masuul ka ah dhaqangelinta sharciyada socdaalka iyo ilaalinta nabadaha xuduuda Maraykanka. DHS waxay isku deyaan in ay ilaaliyaan nabada bulshada ayna ogaadaan dadka sameynaya falalka qaldan ayna dowlada Mareykanka ogoleyn ama ka hor imanaya sharciyada, waxaana taa ka mid ah: Dadka lacagta u diraya dibadaha ee dowladu ay na taageersaneyn.

- Xafiiska federaalka ee baarista (FBI), waa hay'ad dawladeed oo kormeerta amaanka gudaha wadanka Mareykanka iyo la dagaalanka argagixisada gudaha iyo kuwa caalamiga.

- FBI ama DHS waxaa laga yaabaa in ay waraysi la yeeshaan, dadka nabad doonta iyo dadka qaxootiga ah, iyadooy la xiriiri karaan hay'adaha qaxootiga. Waxay su'aalo kaa weydiin karaan taariiqdaadii hore intaadan

Maraykanka iman and kadib markaad timid Maraykanka, hadey u baahdaan information si yaado ah.

- FBI ama DHS waxay ku weydiinkarayaan su'aalo kala duwan aanan aheyn iney kuu daran yihiin.

Maxaan sameeyaa Hadii aan ku raaco in waraysi la ila yeesho?

- Waxaad xaq u leedahay in uu kula joogo ama kula socdo qareen (lawyer). Waxaa jira ururo ku saleysan magaalada Houston ook kugu caawinkara qeybta sharciga iyadoo bilaash ah.

- Waxaad leedahay xuquuda aad dooran kartid waqtiga iyo goobta wareysiga.

- Waxaad xaq uleedahay in aad ogaatid su'aalaha ay ku weydiindoonaan.

- Waxaad xaq uleedahay turjumaan. Waxaa jira ururo ku siinaya turjubaan lacag laa aan ah, oo ku saleysan magaalada Houston.

Xasuuso: Ma jirto wax deg deg lagu masaafurinayo . waxaad leedahay xuquuq badan oo ah siduu sharciga u socdo iyo xaq nidaamka, sidaas oo ah inaad hesho qareen (lawyer) bilaash ah, iyo dhageysi badan.

Maxaan sameeyaa markaan ku jiro waraysiga?

- Weydii kaadhka cadeynta shaqada, waraysiga ka hor.
- Weydii qofka magaciisa, horyaalka, hay'adda lambarka taleefoonka, iyo cinwaanka emailka loogu talogaley. Markaa qoro oo keydi.
- Qor wixii ay ku weydiiyaan ama kaala hadlaan markaad ku jirtid wareysiga. Ama taleefoonkaaga ku keydi.

- **Waxaad xaq u leedahay inaad diido inaad waraaqahaaga wareejisid ama aad tustid.**

- Hadaadan fahmin su'aasha, weydii iney kuu cadeeyaan in taadan ka jawaabin.

- Waxaad xaq uleedahay inaad ka jawaabto su'aalaha aad ku kalsoontahay kaliya. Sideey ahaataba, umalee wax walba oo tidhaahdo in la keydinayo.

- **Waad joojinkartaa wareysiga, marwalba ood dareentid cabsi ama aad ubaahatid qareen(lawyer) inaad la hadashid.**

- ***Hasuuso:*** waa dembi weyn in aad been u sheegto sarkaalka.

Wax ma siin karaa urur samofal ah, anigoonan la ii arag argagixiso?

- Waxay ku xidhan tahay, in aad sii wado lacag siinta hay'adaha aad aaminsantahay, laakiin waa in aad doorataa hay'adaha samofalka ah eed caawineysid. Markaa waa in aadan caawin hay'adaha samofalka ah ee ku jira liiska ururyada argagixisada. Siinta ama taageero dhaqaale hay'adaha Maraykanku uu tuhmayo, taasoo wax yeeli kareysa warqadahaaga sharciga, kuuna keeni karta dhibaatooyin adiga iyo qoyskaaga.

Ma amaanbaa in aan ku dhaqmo diinteyda ama kutukado hay'adaha diinta ama meelaha dadweynaha?

- Waxaad leedahay xaquuq dastuureed oo kuu ogolaaneysa diintaada inaad ku dhaqanto. Waxaad xaq u leedahay inaad tagto meelaha lagu cibaadeysto, dhageysto qudbadaha, aad ka qeyb gasho howlaha bulshada. Hasuusnow, qaanuunka aduu ku illaalinayaa.
- Hadaad la kulantid wax falal naceybsho ah, fadlan la xidhiid askarta magaalada ama hay'adaha qaxootiga.

Maxaan sameeyaa hadii aan dareemo amaan la'aan?

- Hadii qof uu kuu hanjabo ama nafta aad u cabsatid, isku dey inaad ka tagtid oo wacdid 911 oo askarta ah.
- Usheeg hay'ada masuulka kaa ah.
- Hadii caruurtaada loo xoogsheegto iyagoo jooga iskuulka ama meel kale, usheeg dadka masuulka ka ah iskuulka iyo hay'ada masuulka kaa ah.

Xageen ka heli karaa macluumaad?

- La hadal hay'ada qaxootiga ee dejinta.
- Wac (CAIR) Council on American Islamic Relations Houston, (713)-838-2247
- Booqo boga internetka ee Houston Immigration Services sharciga iskaashiga oo ah www.houstonimmigration.or
    - 1-liiska ururada ay dowlada Maraykanka u garatay argagaxiso. http://www.state.gov/j/ct/rls/other/des/123085.htm